Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimmaha siyaasada Soomaaliya (UNPOS)

**WARQAD KU SOCOTA JALIYADDA SOOMAALIYEED (No. 15)**

**Nayroobi, 16 Juun 2009**

**As-salaamu Alaikum**

1. Maalmihii la soo dhaaafay Soomaaliya waxaa lagu xukumayay qoriga afkiisa-laakiin arrintaasi waa in ay hadda dhamaataa laguna bedelaa wada hadal si loo soo celiyo midnimaddi iyo sharaftii ummadda Soomaaliyeed. Sanooyin badan oo iska horimaad hubaysan ka dib, suurta gal ma'ahan in ay habeen qura ay wax isku bedelaan. Somalidu waa in ay fursad iyo waqtiba siisaa Dowladooda si arrimaha u shaqeyaan. Jaliyaddaha si xoog leh ayey uga mid yihiin hay'adaha dowliga ah ee Somaliya ka jira haddii ay tahay xukumad iyo baarlamaanba. Jaliyaddaha waa in ay sii waddaan kalmaynta xukumadda siba kuwa xirfadaha u leh arrimaha maliyadda, dib-u- dhiska mashaaricda iyo wixii la mid ah waa in ay ku soo biraan xukumadda si ay dib ugu dhisaan qaranka.

2 Manta muhimaddu waxay tahay in la tageero xukumadda sharciga ah ee Somaliyeed taasoo ay taagersan yihiin Ururka Middowga Afrika, Midowga Yurub, Jamacadda Carabta, Uruka Islaamka Addunka, Qaramada Middobay iyo waddama kale oo ay ka mid tahay Dowladda Mareykanka. Dhamman ururada iyo xukumadaha aan soo sheegnay waxay wax ka wada saxixeen heshiiskii Jabuuti. Sidaas darteed waa in aad ogataan in ay jirto taageeradaas. Waxaa kaloo loo bahan yahay in aad ogataan guulddaradu in ayeynan ahayn fursad loo baahan yahay.

3. Heshiskii Jabuuti waxaa ku cad qorsho howled oo la donaayo in dadka Somaliyeed iyo bulshada caalamkuba ay racaan ilaa laga gaaro bisha Agusto 2011. Waxaa loo baahan yahay in labaddan sano dib loo soo ceeliyo kala dambeyntii, booliskii, ciidamadii iyo hey'adaha kale ee qaraan oo ay u baahan karto dowlad kasto oo caadi ah. Mar hore ayey ahayd in aad u ogolataan waddankiina inay ku soo noqoto kala dambeyntii dadkiinana aad ka badbadisaan amni xumada iyo quursiga taasoo ku kaliftay dad badan oo ka mid ah dadweynaha in ay barakacaan ama ay noqdaan qaxooti. Muddada kala guurka ka dib, masraca siyasadeed wuxu u furan yahay qof kasta in uu u tartamo madaxnimada. Waqtigaan hadda la joogo, albabada way furan yahiin, xukumadda waxay mashquul ku tahay dib-u-heshiisiin taasoo u furan dhamaan ummada Somaliyeed sida qab-qab layashii hore ee dagaalka, ganacsatada ama xagjirayaasha kuwas oo ay ka go'an tahay in ay wax walba ka hormariyaan nabadda iyo kala dambeynta iyo sidii horey loogu socon lahaa.

4. Qaska joogtada ah, Somali Somali dilaysa, bur-cad badeednimada iyo wixii la mid ah ayaa ku kalifaysa wadamada deeriskiina in ay xududadooda ka xirtaan Somlida ama ay si aad ah isaga illaliyaan. Waxaad airboorada kula kulantaan baaritaan za'id ah oo laydinku sameynayo. Ganacsatada wanagsan ee Somaliyeed si aad ah ayey dhib ugala kulmaan in aay xaaladan oo kale ah ku shaqeyaan. Ganacsatada Somaliyeed si xoog leh ayey dhibato ugala kulantaa safaradooda haddi ay tahay Nairobi, Kenya, Congo, Koonfurta Sudaan, Uganda iyo Bariga Dhexe. Waqtigey doontaba ha ahatee, baaqa IGAD iyo Ururka Middowga Afrika ee ku wajahan in xakamayn lagu soo roogo dekedaha iyo hawada Somaliyeed ay waxyeelo u geysan doonto caymiska iyo qiimaha ganacsigaba.

5. Haddi ay tahay qolokasta AU, EU, IGAD, LAS, OIC iyo Qaramada Middobayba maddaxdu waxay isku racayaan mar kasta in loo bahan yahay hab cusub oo loo wajaho dhibatada labatan jirsatay ee Somaliya. Dhamaan hey'adaha aan soo sheegnay waxay cambareynayaan in awodda xoog lagu qaato ama lagu af gambiyo. Koox yar oo siyasiyiin Somaliyeed ah oo inta badan lagu arko safaraddaha Nairobi ka furan iyo hotellada ayaa cambaraynaya waddankooda iyo xukumaddoda taasoo aan kalmo u ahayn naaftooda iyo mustaqbalka ummadda Somaliyeed. Diplomasiyiinta muhiimka ahna si dhab ah uma qataan warka kooxdani soo sheegto dhab ahaantii kooxdan aan ka hadlayno dhibato xoog leh ayaa ku haysato.

6. Dhamaan dadka Somaliyeed qaasatan kuwa leh waya-aragnimada maamul iyo siyasadeed ee intii ka horeysay 1992 dii ama wixii ka dambeyeyba waa in ay caawiyaan oo wax baraan da'yarta Somaliyeed iyo in ay Somaliya ka saran qaskaan iska daba wareegga ku dhisan. Dhamaantiina waa in aad ka fekertaan sidii loo qaadi lahaa tallabooyin kale ee wax ku-ool leh. Casimadda Muqudisho iyo magalooyinka kale ee waaweyn ee dalkiina ku yala waa in dib loo ifiyaa. Dib ugu noqo dalkiina dadka kaletana ha idiin ku dhex arkaan. Dib u dhis sidii meel rajo ay ku soo noqotay oo kale.

Sida Quraanka lagu shegay Khadumintayda ee naftooda ku xad gudba (ayaagoo galaya dambi) ha ka qusanina Illahay naxaristiisa, dhabtii Illahay ayaa caafiya dhamman danuubta oo dhan. Dhab ahaantii, Alle waa kii cafin badan, uguna naxariis badan. (surat 39-53)

7. Lixdii isbuuc ee tagay waxay ahayeen kuwa aad u buuq badan waxaane lagu mashqulsanaa af-gambigii dhicisoway ee Muqdishu laga damacsanaa iyo ficilkii ka dhasheyba. Arimahaasi waxaa barbar socday kulamo muhiim ah oo ka dhacayey Waashinton , Lodon iyo Rooma. Mar labaad, in kastoo ay jireen ballanqaadyo ah in iska horimaadka hubeysan uu dhammaanayo mar haddii ciidamadii Itoobiya ay baxeen haddana Soomaali ayaa weli Soomaali dileysa. arintani waa inay dhammaataa. Bulshada caalamku waa inay sii wadaa kaalmada ay siineyso xukuumada sharciga ah ee Soomaaliyeed haddii ay tahay dhinaca muraalka, maaliyadda ama taageerada farsamo si loo xaqiijiyo in aynan soo noqonin weeraradan oo kale. Waxaa kale oo muhiim ah in la sii wado xoggana la saaro in qaar ka mid ah dadkii ka dambeeyey qalalaasyadii u dambeysey rabana in dalka qabsadaan in ay ku jiraan liiska Qaramada Midoobey ee Al-qaacida iyo Taliibanka argagixisada waxaane saran cunno qabateen. Haddaan runta sheegno, kuwaan aan soo tilmaanney siday hadda ku xukumi karaan dalka ayadoo ay cuno qabateenkan saran tahay.

8. Sida laga yaabo an aad maqasheen, waxaan booqday Muqdisho 25kii May waxaana lasoo yeeshey waddahadalo wax tar leh Madaxweyne Shariif Sheekh Ahmed, Afhayeenka Barlamaanka, Ra'isulwasaaraha iyo xubno ka mid ah xukuumadda. Waxaan kaloo arkey ciidamada amniga, xeeldheerayaasha iyo ciidamada dhabta ah ee AMISOM kuwaas oo ammaan mudan.

9. Ilaa aam idiin soo qoray waraqdaydi ugu dambeysey waxaa qabtay shir aad u muhim ah IGAD waxaana lagu qabtey Addas Ababa 20kii May shirkaas oo ku baaqey in lagu soo rogo kuwa xukuumada ka soo horjeedo cuno qabateen dhinaca hawada iyo baddaba si kooxdaani u helin hub iyo dhaqaaleba. Arrintaan waxaa markii dambe ansixiyey ururka midowga afrika. Tallaabadani waxaa loola jeedaa in lagu cawiyo deggenanshaha loolamana jeedo in wax loogu dhimo dadka rayidka ah ama ganacsatada. Haddii xukumadda codsato cudurdaar ku saabsan cuno qabateyntani waa la sameyn karaa. IGAD iyo Ururka Midowga Afrika waxay la mid yihiin SADEC iyo ECOWAS waxayna isku dayayaan in ay wax qabtaan si kala dambeyn loogu soo celiyo gobolka.

10. Isbuucii tagey waxaan Rooma ku shir gudoomiyey shiirkii Kooxda Caalamiga ah ee la Xariirka Soomaaliya waxaana ka soo qeyb galay shirkaas wakiilo ka kala socday in ka badan 35 urur goboleedyo iyo wadamaba. Kooxda laxariirka caalamiga waxay ayaguna cambaareeyeen isku deygii kooxaha xagjirka ah ee ka soo horjeeda xukuumadda oo doonayey ay afgembiyaan xukuumadda sharciga ah oo aqoonsi caalami ka haysata adduunka iyo Soomaaliduba. Kulanka kooxda la xariirka waxay si buuxda u taageereen howgalka IGAD iyo kan Golaha Amaanka ee Midowga Afrika waxayna ku baaqeen in kulan deg-deg ah laga yeesho talo soo jeedintii ka soo baxday kulamadoodi ugu dambeyey waa in la xasuusnaadaa in kooxda la xariirka caalamiga ah ay ku baaqeen in laga qaado tallaabo mideysan shaqsiyaadka, hay'addaha, iyo wadamada caqabadda ku ah geedi socodka nabadda waxaana tallabooyinkaas ka mid ah in tallaabo ku haboon laga qaado kuwa ku xadgudbaayo cuna qabateenta Qaramada Middobay.

11. Waxaanu sii wadaynaa in aanu ka sii shaqeyno arrimahii ka soo baxay shirkii Brussels ee lagu taagerayey hay'adaha amniga u qaabilsan Somaliya iyo AMISOM arrintaas oo ah guul wayn ee ka soo hoyatey dhinaca siyassadda, diplomasiyadda iyo dhaqaalahaba. Waxaa cad in qas-wadayaashu ay u weerarayeen xukumadda si ay isu hor tagaan in la helo balanqaadkii ahaa 213 million oo dollar ee lagu balan qaaday shirkii Braussels. Qayb wayn oo ka mid ah lacagta la balan qaaday ayaa loo gudbiyey hay'adaha nabadgelyada Somaliyeed ama Ciidamada Ururka Midowga Afrika.. Xukumadda iyo Ururka Middowga Afrika waa in ay xaqijiyaan in ay la yimaddan xiisaab celin huffan oo ku saabsan lacagta soo gaartey. Waxaan rabaa in aan hoosta ka xariiqo in dhaqaalahaani loola jeedo dhamaan in ay leeyahiin dadka iyo hay'adaha Somaliyeed. Keliya ayanan ahayn dadka Xamar iyo Konfurta ama Bartamaha Gobolada Somaliya ku nool.

12. Anagoo weli ka hadlayno qaybta nabadgelyada, UNPOS waxay shir u ababushay sarakiishii hore ee ugu sareysay ciddamadii iyo booliskii Somaliyeed. Shirkaas wuxuu dhacay intii u dhaxaysay 4-5 June wuxuna ka dhacay Xarunta Jamacadda Washington DC u qaabilsan barashada arrimaha difaca iyo Stratijiyada Africa. Shirkani wuxuu ahaa shir googol xaar ah dibna loogu eegayo wixii casharro ahaa ee horey loo soo bartay iyo sida ugu fican ee loo wajihi karo arrimaha

nabadgelyo hadda iyo mustaqbilkaba quseeyo ee hor tagan waddanka. Shirka waxaa loogu dan lahaa in loogu googol xaaro shir wada tashi ah oo wayn oo dhici doono bilaha Julay ama Agusto.

13. Xafiskeyga wuxuu sii wadayaa in uu mar walba u soo warramo Jaliyadda Somaliyeed inta suuro gal ah. Bishaan June 8deedi aniga iyo Xafiska Dowladda Ingariiska u qaabilsan Arrimaha Dibadda iyo Barwaaqo Sooranka waxaan shir u qabanay 30 qof oo ka tirsan Jaliyaddaha Somaliyeed kuwaas oo aqoon kala gedisan lahaa. Dadka Jaliyaddaha ka yimid intooda badan waxay aad u jecelayeen in ay qayb qataan geedisocodka nabadda kana faa'ideyaan xirfadahooda. Doorka Jaliyaddaha Somaliyeed ay ku tageereen DFKM waa arrin cusub oo na dhiirii gelin mudan.

14. Arrinta burcad badeedka la xirirta sida aad og-soon tihiin arrintan aadka muhimka u ah waxaa looga dooday kullomo badan oo u ka mid yahay kii guddiga caalamiga ahaa ee arrimaha burcad baddedka kasoo ka shiray New York 28dii May 2009. Joogitaanka maarakiibta caalamiga ah ay joogaan baddaha Somaliya waxay calamad u tahay is-barbar-tagista loo haayo dadka Somaliyeed iyo ummadda ku nool Bariga Africa., lakiin kuligeen waxaan isku raacsanahay in arrintaan wax looga qaban karo oo keliya xal ka yimada dhinaca berriga. Bilaha soo socda, arrinta bur-cad-badeedka ku saabsan waxaa la rajaynayaa in ay hoos u dhacdo madama bulshada caalamku ay weli sii waddo taageerada ay u fidinayso dadka Somaliyeed. Waxaa kaloo aan hadda ka fikiraynaa sidii loo dhisi lahaa ciddama illaliya xeebaha Somaaliyeed si ay u illaliyaan biyaha ku warregsan Somaliya kana illaliyaan burcad baddedda iyo dhamaan wixii howla ah ee aan wafaqsanayn sharciga taas oo u danaynaysa dadka Somaliyeed.

Walalkiin,

Ahmedou Ould-Abdallah